TAXANAHA DHAXALREEB III/2008
Oktoober 2008 Ponte Invisibile Ed.

# Toddobaadka Fanka iyo Suugaanta
## Soomaalida ee Landhan



Ayaan Maxamuud Cashuur

**Xuquuqda qoraalkan oo dhammi waxay u dhawran tahay qoraaga oo laga xidhiidhi karo ayan.mahamoud@oxfordhouse.org.uk. Sawirrada waxa qaaddey Ismahan Rashid.**

PONTE INVISIBILE

Buug elektrooniggan waxaa daabcay Ponte Invisibile Edizioni, REDSEA-ONLINE.COM Publishing Group
Oktoober 2008 – daabaciddii 1aad - Pisa

Taxanaha *Dhaxalreeb*:

[1] Jama Musse Jama, Juun 2005
*Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyaarta Layli Goobalay*

[2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005
*Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka*.

[3] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Diisember 2005
*Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal*.

[4] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Jeenarweri 2006
*Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?*

[5] Jama Musse Jama, Abriil 2007
*Tirada iyo habka tirsiimo ee Afsoomaaliga.*

[6] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Meey 2007
*Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed*

[7] Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd", Juun 2007
*"Dhulgariir" waa digniin culus*

[8] Khaalid Jaamac Qodax, Oktoober 2007
*Suugaan Xul ah iyo Abwaan Axmed Aw-geedi "Dheeraad"*
*Maansoyahan mudh baxay!*

[9] Xasan C. Madar, Maarj 2008
*Raad ka mid ah raadadkii addoonsiga.*

[10] Aadam Xaaji Cali Axmed, Seebtember 2008
*Bandhig-buugeedka Caalamiga ah ee Hargeysa*

[11] Ayaan Maxamuud Cashuur, Oktoober 2008
*Toddobaadka Fanka iyo Suugaanta Soomaalida ee Landhan*

Taxanaha *Dhaxalreeb* waa qoraallo aan kalgal sugan lahayn oo sannadkiiba dhowr jeer kasoo baxa degelka redsea-online.com. Waxaa isku dubbarida qoraalladaas Jama Musse Jama, waxaana daabacda shirkadda buugaagta soo saarta ee Ponte Invisibile Ed. ee saldhiggeedu yahay Pisa, Italy.

Bilaash kaga soo rogo degelka www.redsea-online.com/e-books.

# Dib U Milicsi

## Toddobaadka Fanka iyo Suugaanta Soomaalida ee Landhan

*"gobannimo dhammaanteed haddii laysu wada geeyo,*
*ma gudboona geesiga hantiyo gocorka caayaaye"*
Salaan Carrabay.

Khamiistii Oktoobar 9-keedii waxaa ka bilaabmay xarunta hiddaha iyo dhaqanka ee Oxford House toddobaad lagu soo bandhigay Dhaqanka, Afka, Fanka iyo Suugaanta Soomaalida. Waa kulan joogto ah oo sannad walba lagu qabto London, iyada oo lala beegsanayo bisha dabbaaldegga taariikhda dadka madow ee ku nool carriga ingiriiska (Black history month)



**Sannadkani muxuu sannadadii hore kaga duwanaa?**
Sannadkan waxaa hal-abuurka iyo indheergaradka ka soo qayb galay bandhiggan ay ku ballansanaayeen inay ka faalloodaan, ka doodaan, qeexaan macnaha "Gobannimo" iyo waxay goyso; heerarkeeda kala duwan sida ta qofka ama bulshada. Inkasta oo lafa-gurka macnaha saafan ee gobannimadu uu ahaa mucda toddobaadka ee sannadkan, haddana waxa jirey mowduucyo kale oo si gaar-gaar ah loogu falanqeeyey intii uu socdey toddobaadku, waxana ay kala ahaayeen:

- "gobannimada iyo soomaalida",
- "ii qor aan akhristee",
- "doorka maansada ee nabadaynta",
- "fanka iyo toddobaadka", iyo
- "dhallinta iyo toddobaadka".

**Gobannimada iyo Soomaalida**
Maansoyahanno ka soo kicitimay dhul dheer iyo meelo fog iyo aqoonyahanno ku lammaanaa, ayaa habeenkii Khamiista si la yaab leh u kala qalay oo saafay ereyga Gobannimo iyo macnihiisa.



Gobannimadu maadaama ay ahayd furihii Toddobaadka, waxa mawduucan si hagar la'aan ah noogu ibo furay Rashiid Sheekh Cabdillaahi "Gadhwayne" oo tilmaamay in eraygani yahay erey qoto dheer, siyaabo badanna loo adeegsaday. Wuxuu is barbardhigay micnaha gobannimadu leedahay iyo micnaha Geelu dadka Soomaaliyeed badankiisa ugu fadhiyo dhaqan ahaan. Shay walba oo wanaagsan markii aynu qeexayno qarannimo, dowladnimo, qofnimo wanaagsan, waxaa lagu tilmaamay ama Hal ama Gobannimo. Gobannimo-doon ama aynu maallo hasheenna Maandeeq.

Arrinta aadka looga faallooday waxay ahayd halka ereygan Gobannimo macnahiisa laga baadi goobayaa, ma Geedka "Gobka" la yidhaahdo baa? kaasoo yeeshay astaamihii gobannimada lagu qeexay.

Libaaxa laftigiisu dabyar muu shidayn oo waxaa loo aqoonsaday inuu gobannimo-dil ku sameeyo noolaha uu haleelo. Aqoonyahanka iyo suugaanyahanku iyagaa noo sheegaya in dhimashadu kala xun tahay!

Toddobaadka oo mawduucii uu ku qotomay ee Gobannimo weli sii lafa guraya, waxaa sannadkan dadku filayeen inuu ka tayo yaraado kii hore maaddaama ay sannadkii hore marti ku ahaayeen afar maanso-yahan oo fac iyo farshaxanba dadka ku wayn: Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi", Xasan Cabdillaahi "Xasan Ganey", Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" iyo Cabdi Aadam Xaad "Qays".

Dib u jalleeca muuqaalka iyo dulucda barnaamijkii toddobaadka Suugaanta waxaynu si miyir qab ah u odhan karnaa, mid muddo dheer ku luxdanaan doona ama ku negaan doona maskaxo badan oo ka mid ah dadkii ka soo qayb galay, waxaa uu godliyey hankii iyo himiladii dhaqanka Soomaaliyeed oo dadka qaar u haysteen mid gamashiyey ama gaaggaxay oo gabloobay.


Erayga GOBANNIMO wuxuu nala jibaaxay bado iyo berri badan, iyadoo la adeegsanayo fasilaadda ay ka bixisay aqoonta maaddiga, ta diiniga ah iyo Suugaanta intuba. Aragtiyaha laga qabo iyo qoto dheeraanta gobannimada ee meelo badan nala tegay marka laga tago "Geedka Gob" ah oo la sheegay ugu

horrayn inuu ka baxo meel looga baahan yahay, in uu arlada ku yar yahay, in midhahiisa manfac badan yihiin, in aanu xajiin lahayn oo la hadhsan karo, in marwalba uu biyo u dhow yahay. Wuxuu yaabkii ugu waynaa ku dhigay markii Sheekh Dalmar xidhmooyin diini ah oo ku jira Kitaabka in markii Nebi Maxamed la dheelmiyay (NNKH) "meeshii ugu sarraysay ee uu tagay inuu geed Gob ahi ku yaallay" halkaas oo ay madashii qaar badan oo ka mid ahi kala soo baxday in meel ka sarraysa Gobannimo oo bini'aadan higsadaa jirin.

Gobannimadu way kala badhan tahay haddii aan nabarka loo dhaadhicin oo gobannimo la'aanta laga hadlin. Sucaad Carmiye iyo Warsan Cismaan waxay si gaar ah iyagu u xuseen gobannimo xumida lagu hayo dadka la hayb sooco iyo dumarka. Waxay mid marnaba aan la garowsan karin noqotay sida ummaddan qarniyada Gobannimoddoonka ah ama sheeganaysa Gobnimo ay u oggolaatay Gunnimo iyo in la kala sarreeyo, iyada oo aan karaan ama xirfad lagu kala sarrayn ee hayb uun lagu kala sarreeyo.



TAKOORIDDA oo la masaxo mooyee waxaa dad badan ku heshiis yahay in aan marnaba Gobannimo asal ah la heli karin; in aad naftaada ka xoraysid quraafaadka ay ka midka yihiin dad aad dhaqan, dhiig, dhalasho iyo diin midna lagu kala duwanayn, haddana aan helin xuquuqdii iyo sharaftii ay mudnaayeen, waxaana si buuxda loo wada oggolaaday in ay ummadnimada, qofnimada, akhlaaqda iyo aqoonta habboon intaba taasi baal marsan tahay, dhaawacna ku tahay, sidaas darteedna loo baahan yahay in si buuxda loola dagaalamo takoorka



Bandhiggan iyo ka doodidda Gobannimada kaalinta ugu wayn waxaa ka qaatay maansoyahanno iyagu socdaalka ku yimid oo uu ugu fac iyo farshaxan waynaa Abwaan Cali Sugulle Dun-carbeed oo xilligan ku nool Isutagga Imaaraadka Carabta (UAE), waxa u badnaa madasha dad aan hore inay maqlaan mooyee nasiib ay ku arkaan u helin, laakiin haddana suugaantiisa inta aan la garanayn way yar tahay, Abwaanku waxaa uu ku furay maanso yar oo dhinac duco ka ah, dhinacna ulajeeddada kulanka iftiiminaysa.

*" …. Indheergarato soo ururisay oo aayatiin wacan*
*Aqoon in aan is waydaarsannaa baa ujeeddo ah*
*Stacey, Kerry iyo Ayaan, Elizebeth Haines*
*Ogoobay salaan, hambalyo iyo ereyo maamuus leh*
*Idilkiin marwo iyo mudane waa mahadsan tihiin ALL"*

Maanso ay ereyadaasi ka mid yihiin markuu ka baxay waxa oo u ambaxay halkaas iyo Gobannimo;

*Nin Daar galay*
*Nin geed seexday*
*Oo gabadanoonaaya*
*Nin gafuurka taagaaya*
*Oo ganacu waynaaday*
*Nin golxoobay*
*Oo golongolay*
*Oo gabax ah oo liita*
*Mid gurracan*
*Mid gaajoonaya*
*Midaan gasiin haysan*
*Mid i gabay*
*Mid ii soo guntaday*
*Mid i gabraaraaya*
*Mid i ganay*
*Mid iga gooyey iyo*
*Mid igu sii giijey*
*Gobannimo haddaan ahay*
*Rag iyo dumar way gudboonyiine*

*Gobannimooy*
*Waxaad gashiyo*
*Waxaad guddaba*
*Garanayoo ruugnayoo*
*Ku Garwaaqsannay!*

Abwaanku isaga oo habeenkaas iyo toddobaadkaba noo gardaadinaya waxa madasha la wadaagayey abwaan Aadan Tarabi Jaamac oo abwaan Cali Sugulle guddoonsiiyey ushii hal-abuurka isaga oo tilmaamay, in iyada oo gabyaa la wada yahay, haddana inuu Aadan leeyahay geesinnimo dheeraada. Waxaa madasha aad isna looga tebayey oo uu abwaanku xusay ninka uu siiyey hangoolka farshaxannimo ee uu abwaan Adan Tarabi ku labeeyay, kaasoo ah abwaan Xasan Xaaji Cabdillaahi "Ganey", dad badanina waxaad moodaysay inay dookha abwaanka ay ku taageersan yihiin oo sacabka loogama masuugin.



Aadan Tarabi waxa uu gobannimada casriga ah ka tiriyey maanso la magac baxday "Waa shay" oo cusub, oo si durugsan uga hadlaysa, deeqsinnimada, qofnimada, geesinnimada iyo isxilqaanka:

*Gobannimadu waa shay*
*shaqlan oo asturanoo*
*Shacnigeedu muuqdoo*
*Waa shay asal ahoo*
*Shafdhig lagu arooriyo*
*Shansho la hiddo raaco leh.*

*Gobannimadu waa shay*
*shidhixeedu duxo oo*
*sharcigeedu waa nabad*
*shuruuddeedu waa nolol*
*ku shabbahan aqoonoo*
*ku shaadiran xishoodoo*
*shaadh caddaaladeed iyo*
*shimbirkeedu waa deeq....*

Waxaad moodaysey in hal-abuurkii ka soo qayb galay farshaxankoodu inkastoo ay kala facwaynaayeen, laakiin aan lagu kala da'waynayn falkinta, curinta, hormaynta, iyo anshaxa Afka soomaaliga, Waxaa dadka macno gaar ah u samaynayey abwaannada jiilashan soo caan baxay tobankii sano oo ugu danbeeyey, oo wax soosaarkooda dadku dhegadhegayn jireen, laakiin aan weli qurbaha lagula kulmin sida Axmed Aw Geeddi iyo Yuusuf Shaacir oo isaga lagu bartay hees ciyaareeddii dhaqanka iyo hiddaha ee Cambaro iyo Hurre.

Axmed waxaa uu barnaamijka kaga qaybgalay dhowr maanso sida "Inta geesi ciidda u naf baxay waa gun iyo baare. Wuxuuse Gobannimo ka yidhi:

*Garooy garo daa*
*Oo garaan daa*
*Oo garbo cas daa*
*Adna giirooy*
*Ka gu' weynide*
*Guuxa hoosiyo*
*Gardarada daa*

*[...]*

*Gob colawdaa*
*Way gumawdaa*
*Yaaney giir-riyo*
*Gees biciidliyo*
*Goolka naaxiyo*
*Qaanku goosmine*

*Geydha dirirtiyo*
*Gufaacada hore*
*Ugeybkaa go'a*
*Yeynaan gaabane*
*Galeydhyeyntiyo*
*Guubaabada dhimma*

*[...]*



Abwaan Yuusuf Shaacir waxa uu isagu abwaanno badan dheer-yahay ururinta iyo faafinta suugaan ka soo jeedda rug-caddaagii hore. Gabaygan soo socda oo qeexaya ummaddii hore gobannimada siday u dareensanaayeen ama ula muuqatay wuxuu soo xigtay:



Salaan Carrabey gabaygiisii caanka ahaa ee gooshaash:

*ragna guudka waysaga egyahay goonse kala roone*
*gabi waranka gaashanka ficil goray dagaalkeeda*
*guddi murantay waayeel garamay xaajo lagu guulay*
*gacantiyo gasiin laga baxshiyo guriga hawshiisa*
*gobannimo dhammaanteed haddii laysu wada geeyo*
*ma gudboona geesiga hantiyo gocorka caayaaye*

Raage Ugaas oo loo soo sheegay geeridii walaalkii Ugaas Cumar gabaygiisii calaacalka ahaa wuxuu ka eegayaa gobannimada xagga aqoonta, waxaanu yidhi:

*shir sa saba ama saadanba ah amase saakuuba*
*suxulkaa kasoo leef markuu badawgu sooyaamo*
*ragii kala sabaalayn jiriyo sayn caddii madhaye*
*sarsar igu bannaanaa mus iyo sud igu dayraaye*
*soo jeedahaan ku hurdijiray sulubki geeryooye*
*gobannimo raggii sare ka tagay waa siraad damaye*

Yuusuf Shaacir oo ka hadlaya gobannimada iyo in reerka sharaftiisa la ilaaliyo oo aan hadalka hoos loogu daadagin, ceebtiisana loo dhicin wuxuuna yidhi:

*is dhagaysi weeyee markay dhuubka hadal gaadho*
*dhaqankii gobeed iyo idinkoo dheg iyo reer eegay*
*dhoorkaa sareetaa dacwiga laga dhamaystaaye*
*waxba dhiidhi hoosiyo naqiyo dhooqo hay galin e*

Gobannimada iyo dumarka laftigeeda waxaad mooddaa inay xidhiidh saaxiibtinnimo ah ka dhaxaysay, saaxiibnimadaas dhow iyada waxa uu Yuusuf ka soo qaatay, nin la odhan jiray Axmad Bullaale ayaa doonay Ina Suldaan Keenadiid, laakiin markii la soo dhoweeyey, inantiina la siiyey, ayaa reerkii inantu ka dhalatay, waxay sameeyeen arrin xuja ah oo wakhtiyadaa lagu dhaqmi jirey.

Waxaa ay inantii ku soo dareen 20 hablood oo aan laga garan karin, waxaanay ku yidhaahdeen kala soo dhex baxa. Markii ay waxba ka garan waayeen ayaa nin gabyaa ahaa oo ragga la socday, lana odhan jirey Kuluc Cismaan Goone uu gabay mariyey, kuna tilmaamay gabadhii ay u socdeen waxaanu yidhi:

*hal jireeddu geelay sidii hir uga laacdaaye*
*hayinkii baxsani awrta wuu ugu horeeyaaye*
*wiilkii halyeey ihi ragguu haybad dheer yahaye*
*adiguna hablaha waxaad ka tahay heegadoo kale'e*
*horta garannay hoobaan la mood hogashadaadiiye*
*hagoogta iska qaad naag gobaa hadal la taartaaye*

Heestii Hadraawi ee Hablaha Geeska Afrika

*habla weerar galikara*
*hablo geela dhicinkara*
*garta madal kaniqi kara*
*quruxdana kawada goba*
*gees keena mooyee*
*gayi kale ma joogaan*




**Ii qor aan Akhristee!**


Bandhigga Buugaagta oo welwel badani ka taagnaa maaddaama Soomaalidu weli aanay noqon ummad wax akhriska weynaysa, waxaa si fiican uga dhax muuqdey toddobaadka habeen la soo bandhigay buugaag labaatan ka badan oo laga qoray arrimaha Soomaalida. Waxaa ku jiray buugaagta kuwo la filayey iyo kuwo la saadaalinayey oo iyagu cusbaa oo madasha lagu daah-furay, sida "Hal Aan Tebayey" oo Maxamed Baashe Xaaji Xasan ka qoray gabayadii iyo sooyaalkii Xaaji Aadan Afqallooc, oo runtii dad badan oo halkaas joogey habeenkii ilmo badan ka keenay, "Roge" oo dhiiranaantii iyo farshaxankii qoraaga loo hanwayn yahay ee Cabdillaahi Cawed Cige ka muuqato. Waxaad moodaysey maaddaama oo uu sheeko mala-awaal ah yahay inuu yara cidloonayey, laakiin waxaa buugaagta ka dhex muuqdey oo uu yara kulaalayay "Aanadii Negeeye" oo ay dhinaca mala–awaalka iyo quruxda farshaxanka lagu qoray ay wadaagto ka yihiin.





Qoraaga habeenkaas iyo buugaagtoodu may kala dhicin: Saciid Cali Shire oo isagu qoraanimadiisii iyo soo bandhigiisaba ka muuqatey macallinnimadiisu, waxa uu si gobannimo ku dheehan tahay noogu faahfaahiyey buugga "Furaha Ganacsiga", oo runtii isaga iyo buug kale oo ku saabsan "Sida Soomaalidu Geela u Dhaqdo" oo mawduuc ahaan ka duwan, bogag ahaanna ka yar, ayaa isku si loogu wada riyaaqay. Waxaaba laga baqayey inay rugtii suugaantu noqoto mid marna lagu ganacsado marna geel lagu dhaqdo.

"Barashada Afsoomaaliga" oo uu Cabdiraxmaan Abtidoon oo isagu goobta marnaba ka dhaqaaqin toddobaadkii oo dhan uu kaga qayb galay, is waydiin ma leh muhiimadda buuggaasi, oo weliba uu qoray qoraa garaaddo Gobannimo ah sita. Buugaagta kale ee la soo bandhigay habaankaas "Ii qor aan akhriyee" waxaa ka mid ahaa "Aanadii Negeeye", "Hal-Ka- Haleel", "Hal-Karaan", "Guri Waa Haween", "Sodcaalkii Dheeraa", "Nabaadiino", "Geeddi-nololeedkii Yuusuf X. Aadan", "Nabadshe", "Waxay kuu dhigeen ma kugu dhaqeen", " "Sooyaalkii iyo suugaantii Cabdalle Raage", oo uu qoray Cabdicasiis Ibraahim (Xildhibaan), "A note on My Teachers Group: news report on an injustice", "The Dialogue" oo qorey Ahmed Sheikh iyo "Gobannimo Bilaash Maaha" oo uu qoray Jaamac Muuse Jaamac oo isagu isku duba riday barnaamijkan buugaagta, oo aad moodaysay in toddobaadka iyo buugiisa wax badan wadaagayeen. Waxaa isna halkaas buugaag uu qoray, iyo kuwo uu wakiil ka ahaa qoraayadoodaba, soo bandhigay Sayid Axmed Yuusuf "Dhegay".






Waxaa bandhigga buugaagta qayb libaax ka qaatay qalinley muddooyin kala duwan wax ku qoraayey Afka Soomaaliga, waxaa madasha si gaar ah uga muuqday aqoonyahanno isugu jirey Soomaali iyo ajnebi oo iyaguna si cilmi ah u lafaguraayey mowduuc-doodeedyadii la soo bandhigey iyo suxufiyiin si hawl yar u aloosa una dhambala hannaan wanaagga iyo qormaynta afka. Waxay dhiirigeliyeen hal-abuurrada da'da yar iyo dhallinyarada qalilnleyda ee maanta, qorayaashaas  waxa ka mid Cabdi Yuusuf Ducaale (Boobe), Maxamed Daahir Afrax,  Maxamed-Rashiid Sheekh Xasan, Siciid Jaamac Xuseen, Rashiid Sheekh Cabdillaahi iyo qaar kale oo fara badan.

Waxay ahayd madal xigmadeed oo hadalada ugu badan ee dhex marayaa dadku ay ku salaysanaayeen Suugaan, mowduucyada lagaga hadlaayo waxaa lagu ibo furayey ama lagu sargoynaayey suugaan. Qoraagii Geela sida loo dhaqdo oo nagu dhaqaajin gaadhey in aannu geel dhaqasho u ban baxnaa, wuxuu arrinta qoraalkana ka yidhi:

*Akhriska haddaan la baran*
*Buugaagta haddaan la gadan*
*Bulshada dhaqankeeda iyo*
*Aqoon lama baahin karo*

(Maxamuud X. Ibraahim)



**Doorka maansada iyo nabadaynta**

Maadaama aan Gob la ahaan karin iyada oo ay colaadi ka oogan tahay dhul badan oo Soomaali degto, ayay ula muuqatay Oxford House iyo Halabuur Centre in laga hadlo oo la baahiyo suugaanta NABADDA iyo doorkii ay ku yeelan jirtey xallinta mushkilaadka, iyada oo la is waafajinayo dhinacyada suugaanta, waxaa la is weydiiyey maxaa ka khaldan hal-abuurka maanta, haddii af-maalladii hore ay u sahlanayd in ay maanso ku walaaleeyaan reero is dilay oo xinjiri dhexdooda taallo, maxay saamayn weyn u yeelan waayeen maansyahannada maantu?

Maansyahannadii hore ee soojireenka ruugcaddaaga ahaa, ayaa la tilmaamay in ay kaalin mudan ku lahaayeen abuuritaanka colaadda iyo nabadda labadaba. Waxa ay ahaayeen mindi laba afle oo labada dhinacba u adeegsan jirey maansadooda oo dadka saamayn weyn ku lahaa.



Gabyaagii Salaan Carrabey ayaa laba qabaa'il oo birta iska aslaya gabay ku kala dareeriyey. Yuusuf Shaacir oo ka mid ahaa raggii habeenkaas golaha ka muuqdey, ayaa tusaale u soo qaatay gabayga caanka ah ee Salaan carrabey ee "tolow colka jooja" iyo sidii gabaygaasi dhegta furan uga helay labadii qolo dagaalku ka dhexeeyey. Waxa kale oo Yuusuf Shaacir soo qaatay laba gabay oo kale oo kaas u dhigma oo ay sidaas oo kale laba qabiil ku kala dareeriyeen labadii gabyaa ee Faarax Nuur oo reer Hargeysa ahaa iyo Yuusuf-dheere Ibraahim oo reer Hobyeed ahaa. Gabayga Faarax Nuur waxa uu ahaa "Maanta kala hoyda", ka Yuusuf Dheerena "Hooya kala jooga". Saddexdaas gabayba waxa u dhaqan galeen si la yaab leh oo waxa ay joojiyeen dagaalkii, waxanay horseedeen nabad iyo degganaansho.

Ergadii Darroor iyo Shaacir

*dharkaa nagu casaadiyo waxaa dhidid naguud saaran*
*dhaxantiyo awaaraha waxaa dhinacu noodaalay*
*dhankastoo la eegaba waxaa dhooqo nagu taala*
*dhaameelka duhurkii waxaa dhamacda noosaaray*
*dheef iyo adduun maaha dhuuni iyo soore*
*dhiigaa sokeeyaha ragaa dhuuxu qubanaayo*
*dhaawaca iyo geerida halkaa laysku dhimanaayo*
*ee dhalasho raaskii ahaa dhiila laga keenay*
*dhagartiyo waxyeelada in aanu dharta celinaaye*

Rashiid Sheekh cabdillaahi oo ka mid ahaa aqoonleydii habeenkaas ka hadashay mawduucaas ayaa taas hore barbardhigay kaalinta maanta ee suugaanta iyo nabadaynta. Rashiid waxa uu tilmaamay in maanta maansadu aanay kaalintaas hore buuxin karin. Waayo buu yidhi; "berigii hore maansayahanku waxa uu toos ula hadli jirey oo dhex taagnaan jirey cidda is-haysa, waxaanu yaqaanney oo fahamsanaa waxa la isku hayo iyo mushkiladda dhalankeeda iyo waxyaalaha ku xeeran. Maanta waxa la isku hayaa waa siyaasad oo qabaa'il wax

dhex yaalla ma aha ee arrin ku faruur xidhan kooxo iyo gubniyo hadba la dabeecad ah halka ay ku dirirayaan"!

Maansada nabadaynta ee maantu waaxa ay buuxisaa oo keliya kaalinta xummad jebinta oo marka la tirinayo uun baa lagu qaboobaa oo la yidhaahdaa "Allaylehe wuu yidhi iyo Afku kuma go'o". Sidaas ayuu Rashiid ku soo gunaanadey toyashadiisa.

Aqoonyahanka oo doodda isagu door wayn ku lahaa sida Maxamed Daahir Afrah oo isagu abaabulka maalinta iyo ka qayb galkaba wax ku lahaa, waxa uu u banneeyay madasha maanso oo colaaddahaa ka tiriyay Gabyaa Ahmed Aw-Geeddi:

*Nabad baa lagu dhaqdaa*
*Nabad baa lagu dhistaa*
*Nabad baa lagu dhergaa*
*Maxay dhiiladu tartaa*

*Dagaal wiil kuma dhashee*
*Ogow wiil baa kudhiman*
*Dhibaatada qoys qudhiyo*
*Dhuluun kuma aadanee*
*Madhaadoy ruux kastaba*
*Dhabtiisey saaran tahay*

*Hadaynaan dhoohanayn*
*Dharaartii waaberyaba*
*Maxaa dhiiggeena qubay*
*Warmaha isu dhaafsanaa!*
*[...]*
*Dhaayaha isku ooyayiyo*
*Dhagihii maqalkaanu nee*
*Waxyeelada dhaafa hooy*
*Walaalo is dhawrta iyo*
*Dhammaan gacalbaynu nee*
*Belada lama dhiiriyee*
*Samaa loo gogol dhigaa*
*Anaa laandheere iyo*
*Miyaynaan dhaafi hayn*
*Tollaay iyo dhalasho jaan*
*Dhaxdimo sheegiyo dan baas*

Gabyaa Aadan Tarabi oo maalintii nabadda dhowr tixood ka tiriyay waxaynu kasoo qaadan karaa oo runtii aad dadka u qiiro galisay maanso uu ka tiriyay dagaalladii sokeeye ee ka dhacay Somaliland, gaar ahaan magaalada Burco, maansadaas oo la yidhaahdo "ismahura adaa isku habsaamay".

**Fanka iyo Toddobaadka**
Toddobaadka oo weli ka sii faalloonaya nuxurka iyo sifaynta gobannimo waxaa loo diga rogtay dhinicii fanka.

Sannadkan waxaa diyaar ahaa inuu qaybtaa gorfeeyo Aabihii cuudka ama kabanka fanka Soomaalida Axmed Ismaaciil (Xudeydi), oo uu barbartaagan yahay Dararamle. Waxaa habeenkaas soo if baxay in dadku wada saarle yahay.



Waxaa iyana la hayey dhallinyaro oo kabankiisii ku aamino Abwaan Xudaydi, kaasoo ah Suldaan Ibraahim Cali Shire. Aabbihii kabanku waxa uu u hibeeyey oo uu guddoonsiiyay Suldaan cuudkiisii. Gobannimadu waa taas bay dadka qaarkii lahaayeen, waa isku oggolaanshaha, isa siinta iyo isku hibeynta. Suldaan waa da'yar ay maansadiisu nuxur ahaan da'diisa aad uga wayn tahay.

Fanku isaga oo aan dabyar shidayn waxaa habeennadii Jimcaha, Sabtida iyo Axadda si fiican madasha iskugu laba rogay fannaaniin dhowr ah: Lafoole waxaa uu muujiyey inuu ka mid yahay fanka Soomaaliyeed ragga calanka u sida, kabanka oo loo yaqaan car hees, fannaaniintii u babac dhigay Lafoole waxaa ku weheliyay Kaltuun Bacaado, Nimco Deggen, Cabdifataax Yare. Fanku kaalintiisii wuu buuxiyay, waa Jango oo dhinacaas iyo dhaantadii noo kaxeeyay. Madasha iyada looma kala hadhin, waxaa si buuxda uga muuqday, Dararamle, Qaboojiye, fannaanka rug-caddaaga ah, waa Maxamed Axmed Kuluc iyo ka soo koraya, waa Raas.



**Dhallinyada iyo Toddobaadka**

Toddobaadkan Gobannimada oo siyaabo badan arrimo badan oo qabyo ah loogu lafa guray, waxaa si layaab ah dhallinyaradu uga hadashay Gobannimo la'aan waxa ay u dareemayaan dhibaatadooda, isla markaana ku soo bandhigeen suugaan kala duwan oo masraxiyad iyo gabayaba leh, iyaga oo qaarkood adeegsadeen luqadda Ingiriisada.

Waxay si fiican u qotomiyeen qalalaasaha fara badan iyo kale jiidashada lagu hayo, Diintooda, dhaqankooda, ahaanshahooda, isirkooda iyo midabkoodaba.



Dhallinyaradu waxaa kale oo ay muujiyeen inay jirto fan iyo suugaan lagaga gami'i karo farshaxankii iyo codadkii baxsanaa ee fanka iyo suugaanta Soomaaliyeed, waxaa is riixayay, isla qosol oo Prince Cabdi, Cabdi Bahdoon oo Ingiriis ku gabyay, Suldaan Ibraahim Cali Shire oo ku dhashay, kuna koray qurbe, isla markaasna aan hakad iyo leexin midna suugaantiisu aanay lahayn oo Afsoomaali badhaxla' ku gabyayey. In badan waa la soo hadal qaaday toddobaadkana waa la sheegay Cabdifataax Yare in fanka Soomaaliyeed uga gami' doono Maxamed Saleebaan iyo fannaaniin qarnigoodii calanka u siday fanka.



**Maxay ahayd dhalliisha Toddobaadku?**

Iyada oo aan marna shaqo bini'aadan dhalliil la'aan karin, waxaa ugu weynaa oo in la xuso u baahan in Toddobaadku uusan dhalliil la'ayn. Way jireen dad abwaanno farshaxankooda la jecel yahay oo maqnaa, lana tebayey, way jireen dad qof ay isku qolo yihiin muuqiisa tebayey iyo mid laftigiisu madasha iska tebayey. Mid uun baa run ah: inuusan u dhammayn fankii iyo suugaantii Soomaalidu weliba gabayaaga martida ah dhinacooda haddii laga eego. Arrintaasna laba sababood baa ugu wacnaa. Ta hore abwaanno socoto ah oo la filayay inay yimaaddaan oo baaqday. Ta labaadna iyada oo Toddobaadku marnaba isku keenin, ula jeeddadiisuna aanay ahayn in fanka iyo suugaanta Soomaaliyeed la isku wada keeno, ee ay tahay marba qofkii la helo in madasha lagu soo dhoweeyo. Midna waa dhiiri gelin oo waxaa wanaagsan in Toddobaadkan oo kale meelo kale duwan lagu dhigo inta abwaan ee qofku tebayana uu isagu isugu yeedho. Wax aan maanta khasaare ku jirin in labo qof oo hadday doonaan walaalo ha ahaadaane Suugaan, Afsoomaali iyo Fan iskugu yimid.




**Mahadnaq iyo Gabogabo**

Waxaan mahad aan la soo koobi karin leh abwaannadii socotada noogu yimid oo ugu horreeyo, uguna mudan yahay Abwaan Cali Sugulle Dun-carbeed, iyo maansooleyda kale Adan Tarbi, Yusuf Shaacir, Ahmed Aw Geedi iyo Maxamed-Rashiid Sheekh.

Waxaa iyana mahad buuxa leh ururradii barnaamijka wax ka soo qaban qaabiyey guud ahaan sida Oxford House, gaar ahaanna REDSEA-ONLINE.COM iyo Xarunta Halabuur Centre for Culture and Communication in the Horn oo qayb libaax ka qaadatay labada barnaamij ee midna ahaa Nabadda midna soo bandhigga buugaagta.

Waxaa iyana mahad leh suugaanyahankii iyo urruradii Reer London ee sida fiican kaalintooda u buuxiyay sida Cabdi Bootaan "Kurwayne", Cali Axmed Raabbi (Seenyo), Beeldaaje, Caasha Maxamuud Yuusuf (Luul), Caasha, oo iyadu si gaar ah u carisay maanka Cali Sugulle oo gabaygeedii abwaan Cali uu isla goobtii uga jawaabay, Faysal Canbalaash, The Somali Art And Cultural Association, Amran Maxamed iyo Canab Goodsir iyo abwaan Maxamed Xaashi Dhamac London ku sinaa oo nagala soo qayb galay Toddobaadka.

Waxaa iyagu mahad gaar ah leh dhallinyarada iyagu sannad walba u taagan inuu Toddobaadkani hirgalo oo iskaa wax u qabso u ilaaliya xasilloonida, nidaamka iyo hagaajinta Toddobaadka.

Ugu danbayn waxaa mahad aan la soo koobi karayn u celinaynaa shirkadaha iyo ururada iyo Shaqsiyaadka dhaqaale ahaan ama dhiiri-galis ahaanba uga qayb qaatay Toddobaadka: Dahabshiil Money Transfer Company, Daallo Airlines, HAVOYOCO, Art Council England, redsea-online.com , Halabuur Centre, African Education Trust, Skills Development colleague , SORAG, OSCA.



Waxaa mahad celin fara badan leh shaqsiyaadkan oo marna Toddobaadku hagaageen la'aantood, Maxamed Rashiid Sheekh Xasan, Rashiid Sheekh Cabdillaahi (Gadhwayne), Siciid Jaamac Xuseen, Micheal Walls, Maxamed Maxamuud, Maxamed Daahir Afrax Martin Orwin, Maxamed Xassan "Alto" iyo Maxamed Baashe Xaaji Xasan. Shakhsiyaadkaas oo hadba buuxinayey meeshii bannaanaata, isku xidhid, isku habayn, qurxin IWM. Waxa kale oo aan xusayaa Cabdillaahi Cawed Cige iyo Jaamac Muuse Jaamac oo ka qaybqaatay hawshii u diyaargarawga iyo iyaga la'aantood marnaba aannu toddobaadku qiimahaas iyo quruxdaas yeehseen.

Toddobaadku waxaa lagu soo gunaanaday "Nala Wadaag Hibadaada", waxaa hubaal ah qofkii joogay inuu xasuustiisa ka maali doono in hibo badan la isla wadaagay oo muddo maanka doojinaysa.



Waxaasu hubaal ah gobannimo inay ka ballaadhan tahay, ka dhumuc wayn tahay, ka faa'iido badan tahay arrin toddobaad lagu soo af jaro. Waa halkuu abwaan Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi" kulahaa gabaygiisa "Gudgude"

*Gobannimadu waa libin ku taxan, geeddi nololeede*
*Waa gumaro aadmigu hantiyo, guusha ugu weyne*
*Guddoonkeedu waa faral siyaal, loo gafaa firine*
*Geduun buu ka leeyahay khalqigu, maalintuu gado'e*
*marka uu gabaabsiyo xilliga, laga gu'weynaadey*
*Ayuun baa ninkii gudan karaa , dhan ugu guuraaye*
*Qabyadeedu waa guun intay, gaadho weligeede*

*Galab noolba ooddeedu waa , gudinta loo hay-ye*
*Nin gufeeya mooyiye ma jirin, ruux gunaanadaye*
*Gelbiskeeda oo qudha hadduu, tacabku kuu gooyo.."*

*"…Gob baa lagu noqdaa amase waa, lagu gumoobaaye.*
*Garan maayo maalmaha intuu, soor gad leeyahaye*

*".. Hadduu gaar u maamulo qof, waa geel nin leeyahaye*
*Inkastoo gantaal iyo wed iyo, gawrac lagu hooyo*
*Meel loo gun-raaciyo haddaan, gogol dhig loo yeelin*
*Mar haddaan garaad loo lahayn, wayska gubataaye*
*Geedkeed ba'waa sixir haddaan, garasho hilayne .."*

*"..Gobannimadu ruux kuma xidhniyo, Giib ninkii dilaye .."*



Gebagabadii waxaa la odhan karaa baadi-goobka gobannimada iyo helisteeda waxaa ka wayn, oo awood iyo xilkasnimo intaas le'eg inooga baahan, ilaalinteeda iyo xanaanaynteeda. Qofna kaligii gob ma noqon karo haddii inta ay indhahiisu arki karaan, iyo inta aanay gaadhinba, ee bulshada oo ku midka yahay, iyo dhiggiisu aanay haysannin gobannimo taam ah. Waa halkii uu Abwaan cali Sugulle ka lahaa:

*Diric keli ahaantii*
*Daleel guusha kama helo*
*Dadkaa geesi lagu yahay!*
(Cali Sugulle Dun-carbeed)



